

Amaanka cuntada iyo korontada oo tagta

Somali

Maxaan u baahnahay inaan sameeyo si aan cuntada nadiif ugu hayo?

- Waxa ugu muhiimsani waa isku deyida in cuntada qabow lagu hayo. Haddii cuntadu weli qabowdahay marka la taabto, in ka yar 5 digree, waa amaan la isticmaalo.

Ka hor iyo ka dib marka korontadu tagto

- Isku day in cuntada qabow aad fadhiisiso qabowna ku hayso. Haddii cuntadu weli qabowdahay marka la taabto, 5 digree iyo ka kor, waa la haysan karaa lana cuni karaa si loo isticmaalo.
- Marka cuntada la qaboojiyey ama la fadhiisiiyey aanay qaboobayn marka la taabto, 5 digree iyo ka kor, waa in la tuuraa ama, waa la haysan karaa lana cuni karaa ilaa 4 saacadood, haddii uu yahay hilib qabowna, waa in la kariyaa oo la cunaa.
- Cun cuntada kulul 4 saacadood gudahood marka la kululeeyo ama iska tuur.
- Haddii korontada la soo cesho markii wixii la fadhiisiiyey welina qabow tahay cuntadii marka la taabto, kana yar tahay 5 digree, cuntadu waa amaan in dib loo qaboojiyo.

Waxyaallaha aan samayn karo inta korontadu maqan tahay

- Ka saar cuntada firintijeerka oo geli qaybta fadhiisisa.
- Haddii la helli karo, barafka ku jira baagga saar cuntada iyo tareeyada lagu hayo fadhiisiiyaha iyo firijka haddii tegida korontadu ka badan tahay 1 saac.
- Dhig bustaha aan sii dayn cuntada la fadhiisiiyey ama la qaboojiyey markay suurtagal tahay.
- Fur firijka iyo fadhiisiiyaha marka laga fursan waayo keliya. Tani waxay ku haynaysaa cuntada iyo hawada qabow muddo dheer.

Liistada hubinta cunto kaydinta

- Isticmaal liiskan si aad u hubiso in cuntada aad samaysay amaan tahay.
- Isku day inaad qaboojiso tan la fadhiisiiyey iyo tan la qaboojiyey. Haddii cuntadu qabowdahay marka la taabto, ka yar 5 digree, waa amaan.
- Fur firijka iyo fadhiisiiyaha keliya markay laga maarmi waayo. Tani waxay ka dhigaysaa cuntada mid mudo qabow ahaata. Haddii la helli karo, barafka ku jira baagga saar cuntada iyo tareeyada lagu hayo fadhiisiiyaha iyo firijka haddii tegida korontadu ka badan tahay 1 saac.
- Dhig bustaha aan sii dayn cuntada la fadhiisiiyey ama la qaboojiyey markay suurtagal tahay.
- Marka cunta la fadhiisiiyey ama la qaboojiyey la taabto, 5 digree ama ka kor, waa la dhigan karaa waana la cuni karaa ilaa 4 saac markaas ka dibna waa in la tuuraa.
- Haddaad haysato cunto la kululeeyey waa in lagu cunaa 4 saacadood ama la tuuraa.
- Haddii korontada la soo celiyo iyadoo weli cuntadii qabow dahay, in ka yar 5 digree, cuntada waa amaan in la cuno.

Waxaa daabacay Wasaarada Adeega Aadamiga, Unuga Caafimaadka Bay'ada

waxaa la soosaaray: Oktoobar 2006